

Sida Loola Xidhiidho Bukaanku ku Jira Cisbitaalka

Waxa jira siyaabo badan oo la iskula xidhiidho iyada oo la kala fog yahay



U DIR WARAAQ

- Boostada Maraykanku waxay leedahay hab fudud oo farsamo hooseeya oo lagu wadaago waraaqo, sawiro, kaadhahd iyo dheeraad.
- Marka ad galka ku qoraysid adreska ama meesha laga helo qofka, ku dar magaca bukaanka, qaybta iyo lambarka qolka iyo waliba [adreska guud ah cisbitaalka](#) (wac [lambarka guud ee cisbitaalka](#) haddii aanad garanayn qaybta iyo lambarka qolka).



WAC

- Wac [lambarka guud ee cisbitaalka](#) oo sheeg magaca bukaanka (iyo qaybta iyo lambarka qolka haddii ad taqaanid).
- Weydiiso in lagugu xidhiidhiyo qolka bukaanka.
- Xusuusnow: waxa loo baahan karaa inad wicitaanka ka dhigtid mid gaaban sababta oo ah bukaanka oo si fudu u daali kara.



QOR FARRIIN, IIMAYL DIR AMA SAMEE WADAHADAL FIIDIYOW

(bukaanku waa inu awoodo inu isticmaalo qalab u gaar ah)

- Haddii bukaanku haysto qalab u gaar ah oo awood u leh inu helo farriimo qoraal ah, iimaylo ama wicitaano fiidiyow, sidaas kula xidhiidh.
- Ku dar inad ku dartid sawir ama muusik laga yaabo inay ka helaan raaxo.
- Xusuusno: waxa laga yaabaa inay dhib tahay inay isticmaalaan teleefonkooda oo dhakhso u jawaabaan.



WEYDIISO KULAN FIIDIYOW OO AH “CARE TO CONNECT”

(marka bukaanku aanuu lahayn qalab u gaar ah ama aanuu isticmaali karin qalab u gaar ah)

- adeegga shirista ee fiidiyowga ah ee bukaanka ee Allina Health, Care to Connect, waxa uu dhawr qof oo ka tirsan qoyska u oggolaanaya inay iyaga oo meelo kala foog jooga ay wada xidhiidhaan iyada oo la adeegsanayo fiidiyow marka ay joogaan cisbitaalka.
- Booqo [Care to Connect](https://www.allinahealth.org/services/877) ee ku taalla barta internetka ee Allina Health si ad dheeraad u ogaatid.

[allinahealth.org/services/877](https://www.allinahealth.org/services/877)

515765 1220 © ALLINA HEALTH SYSTEMS.